

FURSAD QAALI AH EE GURI GADASHO! CODSIGAAGA SOO GUDBI – IN AAD GURI AAD LEEDAHAY YEELATO WAA SUURTOGAL !

Hay'ada Bloomington ee Guriyeynta iyo Horumarinta (HRA) waxa ay qabaneysaa codsiyada liiska kaydka ee **BARNAAMIJKA KIREYSTAYAASHA DOONAYA IN AY MUSTAQBALKKA GURYO GATAAN.**

Barnaamijka waxa uu qeyb ka mid ah kirada aad bixiso u keydinayaa in aad u adeegsan karto guri aad gadato mustaqbalka. Codsadayaasha ka soo baxa shuruudaha laga doonayo waxa ay kireysanayaan mid ka mid 21 guri ee iskood u taagan ee ka kooban sadexda qol ee hurdada ee ku yaal Bloomington. Marka lagu ogolaado barnaamijka, HRA waxa ay u keydineysaa qeyb ka mid ah kirada aad bixiso bil kasta in aad ku bixin karto lacagta muqadamada ah ee lagaa doonayo marka aad guri gadaneyso.

Si aad xaq ugu yeelato, deganayaashu waa in ay ka soo baxaan shuruudaha hoos ku xusan:

- Ugu yaraan waa in ay guriga ku nool yihiin 3 laakiin aaney ka badneyn 6 qof
- Ugu yaraan waa in dakhligoodu yahay \$24,870 sanadkii ama \$ 2,072.50 bishii
- In dadka guriga ku nool aanu dakhligoodu yahay ugu badnaan sida hoos ku cad:
 - Guri ka kooban 3-qof \$39,000 sanadkii ama \$3,250 bishiiba
 - Guri ka kooban 4-qof \$43,300 sanadkii ama or \$3,608.33 bishiiba
 - Guri ka kooban 5-qof \$46,800 sanadkii ama or \$3,900 bishiiba
 - Guri ka kooban 6-qof \$50,250 sanadkii ama or \$4,187.50 bishiiba
- In aad awood u leedahay in aad bixin karto kirada iyo biyaha, korontada iyo gaaska ugu yaraan \$954 bishii oo aanu ku jirin gargaarka. Waxa laga yabaaa in kiradu ay intaa ka sareeyso taasoo ku xiran dakhliga idin soo gala.
- Dadka guriga ku nool oo dhan waa in ay haystaan dhalashada wadanka ama xaalad deganaasho oo waaxda socdaalku ogoshahay.
- Waxaa lagu sameynayaa baaritaan dadka guriga degan la soo baarayo hadey horey u geysteen fal dambiyeed, sid ay kirada u bixin jireen, iyo sida ay tahay deyn qaadashadooda. Dadka horey u galay fal dambiyeed ama aan lahayn deyn bixin wanaagsan waxaa laga yaabaa in aanay ka qeyb qaadan karin.

CODSIGAAGA U SOO GUDBI MAANTA!

**Si aad u codsato arji, soo wac 952-563-8937 inta u dhaxeysa
8:00 aroornimo iyo 4:30 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha
(Khadka TDD dadka aan waxba maglin 952-563-8740)**



FURSADDA GURYAHA WAA LOO SIMAN YAHAY

Magaalada Bloomington ma samayso midab kala sooc ku dhisan curyaanimada ama ogolaasho u helidda, ama sida ay ula dhaqanto, ama u shaqaalaha ugu qoroto barnaamijyadeeda ama hawlaha kale ee ay qabato. Marka aad codsataan, waxaa dadka naafada ah loo fidinayaa adeeg u fududeynaya in ay ka qeyb qaataan adeegyada, barnaamijyada, iyo hawlaha kale ee magaalada magaalada Bloomington. Marka aad codsataan, waxaa macluumaadkan aad ku heli kartaan isaga oo far xardhan, ku daacan far waaweyn, cod ahaan u duuban ama lagu keydiyey cajaladda kombiyuutarka.